# Ku soo dhawoow Fuller Farm

**Xeerarka Hantida**

- Waaxa la ugaarsaan kara oo keliya haddi oggolaansho la haysto.
- **Eyda waa in qool lagu xidhaa agagaarka Hayfield laga bilaabo 1da Maayo ilaa 1da Agosto si loo ilaaliyo shimbiraha buulasha dhulka ka dhista.**

**Xogta Hantida**

Fuller Farm Preserve oo dhan 89 hektaar oo hanti ah, waxay leedahay shabakadeena waddooyinka ee ugu weyn, waana mid ka mid ah kuwayaga la ilaaliyay ee ugu caansan. Fuller Farm waxay hoy u tahay beero furan, kaymo kala duwan, noole shimbiro ah oo badan, durdurro, biyo-dhacyaal, waxayna wajiga ku haysa Nonesuch River. Muddo ku dhawaad 100 sano aya Fuller Farm lagu beeri jiray dalagyo iyo caws laguna dhaqi jiray xoolo. Hadhaaga dhaq-dhaqaaqa beeraha waxaa laga arki karaa kaymaha ku teedsan cidhifka waddooyinka. Beerta Fuller waxa laga maamulaa laba mashruuc oo dib-u-soo-celinta deegaanka ah: Grassland si ay shimbiruhu buulal uga dhistan, iyo kaynta Early Succession ee logu talagalay Bakaylaha dabbada cad leh ee New England oo afka u saran dabargo'. Guga iyo xagaaga, Bobolink (oo ah nooc shimbir oo dhulka buul ka dhista) aya yimaada beerta cawska si uu u dago. Beerta cawska waxa la gooyaa xagaaga daba yaaqadiisa, ka dib marka shimbiraha u dambeeyay ee dagana ay ka duulan. Tani waxay hirgalinaysaa deegaanka cawska iyadoo ka hortagaysa bixitanka geedaha yaryar. Waxaan la kaashanay hay'adaha Adeegga Kalluunka iyo Duurjoogta Mareykanka si aan ugu abuurno deegaan bakaylaha dabbada cutubkale (cottontail rabbit) gobolka New England ee afka u saran dabargo'a. Tani waxay amraysa in si joogto ah loo gooyo dhulka cawska hal meel si loo abuuro deegaan geedo yaryar leh halkaas oo bakaylaha ay calafsan karaan gabbaadna u noqon karta.

**Waddooyinka**

Eyda waa in qool lagu xidhaa agagaarka cawska laga bilaabo 1da Maayo ilaa 1da Agosto si loo ilaaliyo shimbiraha buulasha dhulka ka dhista**.**

Dariiqyada Fuller Farm waxay maraayaan dhul kala jaad ah oo kala sareeya waxayna ku kala duwan yihiin ballaadhka iyo qab sameeyskooga.

Overlook Trail wuxuu leeyahay fadhi ay sameeyeen dadka degan Piper Shores iyo muuqaalo ballaaran oo ah dhanka-hore dhul-beereedka iyo qorrax dhacyo aad u qurux badan. Waddadu waa wasakh iyo caws isku jira.

Hayfield Trail wuxuu ka baxaa goobta baabuurta la dhigto ee dhanka galbeed wuxuuna raacaa cidhifka garoonka ilaa uu ku biiro jidka Maine. Hayfield Trail wuxuu leeyahay kursi ay leeyihin Eagle Scout Jacob Murphy, oo wajahaya geedaha mapleka ee ku yaal bartamaha garoonka, iyo deegaan balladhaan oo sahla inay ubaxu ku tarmaan kuwaas oo u ka mid yahay geedka caano dareeriyaha ah. Waddada tamashlaynta ee quruxda badan waxay hor marisa dadka soo booqda ubaxyoo buluug ah iyo dhirta kale ee ka baxda dhulka goyan, waxaana waddada hindisay Tom Nolan. Oogada dariiqan waa caws iyo buundado.

Maine Trail waxay geysaa soobooqdayaasha cidhifka woqooyi ee hantida, iyada oo loo marayo kayn kala duwan, waxayna ku xidhanta Brook Trail, Trail Bird iyo Waterfall Trail. Dhammaan wadooyinkani waxay leeyihiin taargooyin dhaadheer laakiin gaaban, waxay ku kala duwan yihiin ballaadh, kaaso ka bilaama 5

cagood ilaa 3 cagood, waxayna ka gudbaan biyaha iyo meelaha dhooqada ah. Dusha sare ee dariiqyadani waxay leedahay wasakh, dhagax xididdo leh mararka qaarkood, iyo isku xidhid.

**Hawsha Scarborough Land Trust: U Ilaalinta dhulka dadka iyo duurjoogta - weligeed.**

Scarborough Land Trust (SLT) waa hay'ad gaar loo leeyahay, aan macaash doon ahayn, ku salaysan urur bulsho oo ay ka go'an tahay ilaalinta dhulka ay khayraadka dabiicigu, muuqaalada quruxda badan, iyo muhiimad taariikheedkoodu ay bulshada u leeyihin qiimo gaar ah.

Iyado la asaasay 1977kii, SLT waxa ay ilaa maantadan ilaalisay in ka badan 650 hektaar, laga bilaabo dhulka caanka ah ee Scarborough Marsh ilaa hantiyaasha dhulka gudaha ku yaal o ay ka mid yihin beero, kaymo, webiyo, durduryo, iyo dhul beereed.

SLT waxay si joogto ah ula shaqeysaa la-hawlgalayaasha maxalliga ah iyo kuwa gobolka, sida Saaxiibada Scarborough Marsh, Magaalada Scarborough, Maine Farmland Trust, Rachel Carson National Wildlife Refuge, Waaxda Maine ee Kalluumeysiga Gudaha iyo Duurjoogta, iyo Hay’ada Ilaalinta Kheyraadka Dabiiciga ah.

**Aqoonsiga Dhulka**

Scarborough Land Trust waxay aqoonsan tahay in dhulalkani ay ku yaalaan dhulka hooyo ee Qaraanka Penobscot, halkaas oo dhibaatooyinka biyaha iyo xuquqda dhulko iyo ku xadgudubka goobaha xurmada leh ay yihin kuwa joogto ah. Dhulka hooyo ee Penobscot waxa uu ku xidhan yahay quruumaha kale ee Qabaa'ilka Wabanaki - Passamaquoddy, Maliseet, iyo Micmac - iyada oo loo marayo qaraabonimo, isbahaysi iyo diblomaasiyad. Waxaan garwaaqsanahay in Beelaha Wabanaki ay yihiin beelo siyaasadeed, kala duwan, madax-bannaan, oo sharciyaysan, sido kalena leh awoodo iskood isku maamul iyo aayo ka tashi ah.

**Xeerarka Hantida**

Hubi inaad u hoggaansanato xeerarka soo socda si ay hantideenu ugu furnaato soo-booqdayaashu:

- Dhammaan hantidaani waxay furantahay subaxda ilaa maqribka. Lama ogolo isticmaalka habeen dhaxa ama kaambada.
- Dabka kaamboda iyo sigaarka waa mamnuuc.
- Baaskiilada iyo baabuurta matoorka leh waa mamnuuc.
- Faa'iidada iyo ilaalinta booqdayaasha iyo duur-joogta darteed, lama isticmaali karo diyaaradaha aan duuliyaha lahayn ama aaladaha kale ee duulista.
- Haddii goobta baaburto la dhigto buuxsanto, fadlan soo noqo mar kale! Lama ogola in dhinacyada wadada la dhigto baaburta. Intaa waxaa dheer, baarkinka waxaa loogu talagalay soo-booqdayaasha oo keliya.
- Wax raad ah ha ka tegin oo gur qashinka iyo hadhaaga cuntada. Dhab ahaantii lama ogola wax qashiin quub ah.
- Ku joog waddooyinka calaamadeysan si aad u ilaaliso duur-joogta, naftaada, iyo hantidayada.
- Ka fogow dariiqyada marka qoyaan iyo dhooqo xad dhaaf ah ay jiran.

- Ixtiraam jaarkayaga oo ku ekaw joogitaanka hantida SLT.
- Ixtiraam khibradda soo-booqdayaasha kale adiga oo aad u yareynaaya buuqa/codka.
- Dadka eyda wata, fadlan u fiirsada siyaasadayada. U hoggaansanaanta siyaasaddan waxay ka caawisaa SLT inay u furnaato eeyaha, waxayna ilaalisaa badbaadada eyda iyo soo-booqdayaasha. Waad ku mahadsan tahay iskaashiga!
    - Ilaali sharciyada gaarka ah ee ku saabsan isticmaalka eyga ee waddooyinka iyo hantidayada qaarkood.
    - Eeydu waa in ay qool ku xidhnaadan marka la korsiinayo lagana soo dejinayo baabuurta iyo arrinkaas waa in lagu sameeyo meel 300 cagood u jirta meesha baabuurta la dhigto.
    - Lama ogolo wax ka badan 2 eey oo bila qool ah oo hadal si adag logu xakameeyo.
    - Qashinka bac ku guur oo qaado.
    - Eeygaaga ha u oggolaan inuu dadka u soo dhawaado oggolaanshahooga la'aanteed!

**Xogta Shillinta**
Shilintu waa cayayaan wax qaniina oo ku nool cawska dhaadheer iyo geedaha yaryar. SLT waxay u shaqeysaa si ay u abuurto waddooyin ballaaran si ay shillinta uga fogayso soo-booqdayaasha.

Arrimahaan waxay ka caawiinayan sidi aad iskaga illalin lahayd shillinta:

- Ku joog waddooyinka calaamadaysan oo iska ilaali cawska dhaadheer iyo meelaha geedaha yaryar leh.
- Maryahaaga mari wax ka celinaya shillinta.
- Xidho shaad gacmo dhaadheer, surwaal dhaadheer, iyo sharabaadna surwaalka guud mari.
- Marmar iska baadh shilinta. Korkaaga ka daaddi wax kasta ood arki kartiid inta lagu jiro socodkaaga, ka dibna aad iskaga baadh shillinta markaad guriga tagtiid.

**Booqo Hantideena Kale**

Sahami oo ku raaxayso waddooyinka Scarborough Land Trust oo u furan sanadka oo dhan da' kasta xilli kasta!

Libby River Farm Preserve: Iyado ku xigta Camp Ketcha, hantidanii waxay leedahay waddooyin dhex mara alwaaxyo, dhul qoyan iyo beero iyo sagxad indho-indhayn ah oo eegaysa Scarborough Marsh. Cinwaanka: 320 Black Point Road (1 mayl (1.6 km) oo waddooyin ah)

Pleasant Hill Preserve: Hantidani waxay leedahay wadooyin dhexmara beeraha iyo kaynta, iyo 0.3 mayl (0.5 km) Jidka Universal Trail. Cinwaanka: 270 Pleasant Hill Road (2.5 mayl (4 km) oo waddooyin ah)

Warren Woods Preserve: Hantidani waxay leedahay saddex waddo oo isku wareeg ah oo ku dhex yaal dhul cagaaran oo qurux badan. Cinwaanka: 363 Payne Road (1.4 mayl (2.25 km) oo waddooyin ah)

Sewell Woods Preserve: Hantidani waxaa ku dheex yaal waddo alwaax ah oo dabacsan oo leh buundooyin dulmara Stuart Brook iyo waddo loo maro Frith Farm. Cinwaanka: 50 Ash Swamp Road (1.1 mayl (1.8 km) oo waddooyin ah)

Fuller Farm Preserve: Hantidan waxay leedahay shabakadeena waddooyinka ee ugu weyn iyo beero furan oo dhinaca ku haya ka soo horjeedka Nonesuch River, iyo durdur biyo-dhac leh oo qurux badan. Cinwaanka: 305 Broadturn Road (3.5 mayl (5.6 km) oo waddooyin ah)

Broadturn Farm Preserve: Tani waa hantidayada ugu weyn, oo ay ka mid yihin beer dabiici ah, waddo gaaban oo loo maro Silver Brook, iyo waddo kayn ah oo xooga ka dheer. Cinwaanka: 7 Hanson Road (0.6 mayl (1 km) ee wadooyinka

Blue Point Preserve: Hantidani waxa laga hella muuqaallo dhinaca hore ee biyaha Scarborough Marsh, meel lagu socdo oo ballaadh iyo debecsani leh iyo safar gaaban oo kaynta dhexdeeda ah. Cinwaanka: 5 Seavey Landing (0.6 mayl (1 km) oo waddooyin ah)